Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka

Hadal-qorolaaka kal.6-aad
Documentiga Kal.6-aad/kul-3aad **13/05/2015**

Kalfadhiga 6-aad
Kulankiisa 3-aad Saac.Fur. 12:00gh-Saac, Xir.2:05gd.
Guntinta (Qourum) Xildh 147
Ajendaha

1. **Furitaanka Aayadaha Qu'aanka kariimka**
2. **Ansixinta Ajendaha**
3. **Dhaarinta Xildhibaanada**
4. **Qeybinta Khudbadda M/Weynaha ee Furitaanka kalfadhiga 6-aad ee Golaha Shacabka.**
5. **Qeybinta Hindisa Sharciyeedka Warbaahinta**
6. **Qeybinta Soojeedinta Guddiga Xeer-Hoosaadka ee wax ka badelka Xeer-Hoosaadka.**
7. **Qeybinta Motionka ee Dhismaha Golaha Maamul Goboleedka KMG Jubbooyinka.**
8. **Qeybinta Soo jeedinta Qaranka Dib-udhaqangelinta Adeegsiga Shilin Soomaaliga.**
9. **Su'aal Oraaheed loogu yeeray Guddoomiyaha Bankiga Dhexe:Weydiimaha guddiga maaliyadda Iyo Qorsheynta Golaha Shacabka.**
10. **Dhageysiga Warbixinada Deegaanada Doorashooyinka:**
    a)Gobolka Bay **Xil.Axmed Xaaji Maxamed**
    b)Gobolka Sanaag **Xil.Mahdi Cali Cusmaan**

1.Shir-guddoomiye,Guddoomiyaha Baarlamanka JFS Mudane Maxamed Sh.Cusamaan Jawaari, Waxaa shirka furay Guddomiyaha Baarlamaanka Mudane Maxamed Sh.Cusmaan Jawaari,waxaa lagu furay Aayadaha Qur'aanka Kariimka uuna Akhriyay Xildh..Sheekh Shaacir.

2.Guddoomiyaha wuxuu weydiistay Xildhibaanada in la ansixiyo Ajandaha Shirka xildhibaanada way ansixiyeen. Guddoomiyaha wuxuu kaloo sheegay in Ajandaha 3-aad uu yahay Dhaarinta Xildhibaano Cusub.Wuxuu soo jeediyey in marka hore la dhaariyo Xildh.Cusub.

Kadib ,waxaa la Dhaariyey 3- Xildhibaan oo kala ah:-

1. **Xil.Qaasim Cali Nuur oo lagu bedalay marxuum -Xildh.Cumar Cali Nuur**
2. **Xil.Qaasim Axmed jaamac oo lagu bedalay, Xildh. Bashiir Maxamed Jaamac kadib, markii uu baneeyey jagadii Xildhibaannimada , Waxaan dhaariyay Xil.Sh.Shaacir.**
3. Guddoomiyaha wuxuu kaloo sheegay codsi ogeysiis yar uu inoo sheegi doono wasiirka Wasaaradda Dhalinyarada iyo Isboortiga Mudane Maxamed Cabdullaahi Xassan(Nuux) in wasaaradda ay qaban doonto 14/05/2015 tartan Ciyaareed ee Kubadda Cagta iyo

Xarig-jiid ah 15ka May loogu dabaal dagaayo weyneynteeda ay is kaga horimaan doonaan garoonka Aadan yabarow Wiish(ex Luujilo)labada kooxood oo ka kala socda wasiiradda Xukuumadda iyo Xildhibaanada Baarlamaanka Ciyaar tooydooda.

Kadib,Guddoomiyaha wuxuu sheegay in arinta Shillin Soomaaliga ay tahay mid aad ixsaasi u ah waa astaanta iyo sharafta ummadda Soomaaliyeed,lagana doonayo Xildhibaanada in ay si fiican u soo akhriyaan Dhaqangelinta Shillin Soomaaliga.

Wuxuu u yeeray Guddoomiyaha bankiga Dhexe Mudane Bashiir wuxuuna sheegay faahfaahinta ballaaran oo ka bixiyay sida uu sheegay Guddoomiyaha Baarlamaanka in shillin Soomaaliga uu duugoobay muddo bandanna soo shaqeeyay.soo diyaarinta Shillin Soomaaliga wuxuu u baahanyahay lacag badan oo gaareysa$25Million oo dollar,waxayna ubaahantahay Amni in shillinka la diyaariyo,waxay kaloo ubaahantahay in la diyaariyo dadkii meel ku xafidi lahaa oo qeybin lahaa iyo sharciga awood qeybsiga maamul Goboleedyada qaarkood weydiideyn lacagta shillin Soomaaliga markii ay jiri jirtay Dollar bankiga ayuu ku xirnaan jirey.Shillin Soomaaligana waa la qeybin jirey oo la bixin jirey dollar kana wuxuxu ku xareesnaan jirey Bankiga.haddii aan hadda aan laga fikirin sida laga yeelayo Shillin Soomaaliga,haddii aan qeymaheeda aan la ilaalin Karin ma noqoneysaa lacag. Dowladda haddii ay geliso Sh.so wadanka,bankiga Dhexe waxaa waa jib ka saaran yahay in lacag taasi ay ilaaliso.

Wixii sharci dajin ah waxaa looga fadhiyaa Golaha Baarlamaanka in uu sharci kasoo saaro wixii ku saabsan Bangiga dhaxe. Dowladda waxay kala hadalnayn kana codsadeyn in dowladda ay lacag soo sameyso kadibna uu xakameyo, qofkana uu qeymahiisa ka helo.

7. guddoomiyaha wuxuu sheegay in Xildhibaanada ay Guddiga maaliyadda ka tirsaneyn ayna su'aalo weydiinkaraan Guddoomiyaha Bankiga dhexe, su'aalaha ay weydiinayaana ay ahaadaan kuwa kooban wuxuu amray xogheynta Xildhibaanada su'aalaha ay soo jeedinayaan soo qoraan. Kadib waxaa bilaabmay su'aalaweydiin Guddoomiyaha Bankiga dhexe.

8. Xildh.Cali Nuur wuxuu sheegay in sharcigii hore ee ceymiska ay jiraan shirkado oo wax sharci ah ku shaqeynin hadaba xagee uga keenteyn sharcigaas.

Jwb.

Guddoomiyaha Bankiga dhaxe wuxuu sheegay haddii aanan u heynin wax sharci ah, waxaan sameynay in sharcigii hore lamaro oo lagu dabaqo wuxuu kaloo intaa ku daray in arinkaas ay u taalo Golaha sharci dajinta ay sharci kasoo saaraan.

9. guddoomiyaha wuxuu sheegay in sharcigii hore laga heli karo wabsideka BaarlamaankFS illaa 1960kii

Xildh. Cabdullaahi Jaamac wuxuu u mahadcaliyay Guddoomiyaha Bankiga dhexe sida wanaagsanayd uu u faahfaahiyay wuxuuna weydiiyay:-

- Ma 'ogtahay tirade Shillin Soomaaliga hadda la heysto?
- Ma ka fikirteyn in hay'ado Maaliyadeed ay la shaqeeyaan Bankiga dhexe?
- EVC Bang ma ogtahay tiradooda?
- Koontarool ma ku leeyihiin Bankiga dhexe?

Xildh.Muuse, wuxuu weydiiyay :-

- in Bankiga dhexe ay maraan habka maamul-maaliyeedka?
- Bankiga aduunka mushaarka shaqaalaha imise bilood ay ku soo shubaan Bankiga Dhexe maxaase keenay cabashada mushaar la'aanta.?

Xildh. Khaliif Maxamed Xaaji wuxuu weydiiyay:-

- Bankiga wuxuu owood u leeyahay wixii soo gala inuu isaga bixiyo.?
- Maamul-goboleedyada jira sidebey ula soconkaraaan canshuuraha Xukuumaadda ay qaado? Sida xawaaladaha EBang
- in la cadeedyo sadexbiloodkii mushaarkii shaqaalaha meesha uu ku maqan yahay?

JWB

Guddoomiyaha Bankiga dhaxe wuxuu sheegay in lacakta Sh.Somaaliga ee suuqa ku jirto ay tahay 1.300(hal Tirilyan iyo saddexboqol oo bilyan.? Waxaa kaloo ka danbeeyay lacag shilin Soomaali ah oo been abuur ah waxaa kaloo jira lacag uu horey Madaxweyne C/llaahi Yuusf Axmed uu amray in lasoo sameeyo lacag shilin Soomaali oo gaareyso lacagta sare aan ku soo sheekney.

EVC waxaa loogu talagalay dad xisaabaadtooda isku maamulayo, Bakiga ma koontaroolikaro hay'ado kale balse EVC ga wuu la soconkaraa.. Mushaarka shaqaalaha bil-bil uma yimaado waa heshiis amaah Dawladeed wax lixisaabiyo oo laysku qaban karo ma aha. Markii lacag lasoo sameeyo Bankiga ayey faa'iido u tahay laakiin lacagtaas badalkeeda waxay u baahantahay in Baarlamaanka uu wax ka badalo.

Lacagaha dibada ee xawaaladaha barkiga dhexe ma maamulaan mana koontaroolaan balse EVC way koontrooli karaan haddii Dowladda ay sameeyso sistam maamul eek u began E-Bank.

Xildh.C/llaahi Cabdi Xuseen wuxuu weydiiyey :-

- Bankiga uu wax ka qaato ,maxay tahay?
- Shuruucda Bankiyada kale ula dhigano waa maxay ?
- Xawaaladaha sideebaad u kontrooli kartaan?

Guddoomiye K/Xigeenka 2-aad ,wuxuu su'aaley Guddoomiyaha Bankiga Dhexe ,waxaa haboon in la caddeeyo 5 pillion Shillin Soomaaliga waxa ay tahay ,ma lacagta daabacan ee taala dalka Suudaan,wax aa la rabaa in arinkaas faah-faahin uu ka bixiyo Guddoomiyaha Bankiga Dhexe?

Xildh. C/risaaq Jurilla,wuxuu weydiiyey Su'aal ah,

- In ay jirto siyaasadda u kuurgalka lacagaha Qaranka in Bankiga dhexe uu leeyahay .Ma jirtaa siyaasad lacageedee Qaran oo baarlamanka aad weydiisateyn?
- Bankiga Dhexe horey xiriir ma ula lahaa Bankiyada kale iyadoo isweydaarsanaaya Xawaaladaha?
- In lacag qaran la sameeyo ,qorshahaas tallaabadee ka qaadi kartaan ?

Xildh.Raabaco Sheekh Nuur Waxay su'aashay

- Shatiga iyo is-diiwaan gelinta Ganacsatada la siiyo ma leeyahay dhicid(dateline) ama dhicis ma laha ?
- Sideebaa loo sameynkaraa ,goormaase la helikaraa Lacag shillin Soomaali?

Xildh.Saciid Maxamed wuxuu sheegay in Xildhibaanadii hore gunnadooda Bankiga la geeyey lacagtaas sidey noqotey naga sii Mudane Guddoomiye Faah -Faahin?

Xildh. Muuse wuxuu sheegay in uu rabo in loo caddeeyo

- Hantida Bankiga uu la wareego?
- Lacagta sahay safarka ay Madaxdo ku safraan in loo caddeeyo?

Jwb.

Guddoomiyaha Bankiga Dhexe,wuxuu sheegay in halkaan uu ka sheegikaro ,haddii Xildhibaanada ay hayaan Faldanbiyeed ama keys ay la imaankaraan?

Wixii Baarlamanka uu ogplaadey in ay bixiyaan keliya wax kale aysan bixin.waxaa Miisaaniyadda Ilaaliya Xisaabiyaha Guud iyo Hanti-dhawrka Guud.

Shirkadaka waxaa la siiyaa ruqsad hal Sanno ah ,kadib waa loo cusbooneysiiyaan. Bankiga dhexe wuxuu leeyahay sharci gaar ah uu ku hawlgelaayo, wuxuuna xiriir la leeyahay Bankiyada Caalamka.

Wuxuu kaloo sheegay in xildhibaanadii hore lacagtooda la diyaariyey in la bixiyana way aheyd ,laakiin warqad ayaa naloo soo direy oo lagu joojinaayo lacagtaas.

Guddomiyaha wuxuu kaloo sheegay lacagaha been abuurka ah uu Bankiga ogolaan Karin maadaama uu sharci aheyn,dadka hawlaaasi ku shaqada leh ay ka hawlgalaan joojinta lacagtaasi been abuurka ah.

Wuxuu soo jeediyey in lacagta shillin Soomaaliga ,dib loo soo noqo sababtoo ah baahi weyn ayaa loo qabaa in la soo sameeyo,Baarlamankana waxaa laga rabaa in uu qaraar ka gaaro.

Wuxuuna soo dhaweeyey warkii Xildh. C/risaaq Jurilla uu ku sheegay in la sameeyo Siyaasadda u kuurgalka lacagaha Qaranka oo lagu sameynaayo lacagta shillin Soomaaliga.

Guddoomiyaha Golaha Shacabka wuxuu sheegay hadal ada dhegihiisa ku soo dhacaaya ay yihiin Dawlad Goboleed,arinta sidaa ma aha,wax la yiraahdo dawlad Goboleedna ma jiro ,waxaa jira Maamul Goboleedyo Ku-meel-gaar ah.

Midda kale, wuxuu sheegay in ay u dhimantahay Hal Ajende oo ah Ajendayaasha maanta laga hadlaayey oo ah warbixinta Deegaanada ay Xildhibaanada tagayn, su'aasha meesh ku jirtana waxay tahay :

- Waa maxay Caqabadaha ay soo arkeyn?
- Caqabadaha gaarka ah oo ay leedahay Degmadaasi ?

Kal.6-aad Kul.3-aad uu shirguddoominaayey Guddoomiyaha Baarlamanka JFS Mudane Maxamed Sheekh Cusmaan (Jawaari , wuxuu sheegay in shirka uu xiranyahay Saacaddu markey aheyd 2:05gd.